

## **Tababbar NOLOL 2025**

Maalinta Arbacada ee 9 Abriil waxay xarumaha caafimaadka ee NU, oo ay wehliyaan Ciidamada qalabka sida, bixin doonaan tababbar ku saabsan musiibo ay dad badani ku dhaawacmeen. Waxaa tababbarka loogu yeeraa "NOLOL 2025". Halkaan ayaadna ka heleysaa macluumaad ku saabsan tababbarka.

**Waxaa tababbarka lagu qabanayaa NÄL oo ku taal Trollhättan, maalinta Arbacada ee 9 Abriil, 2025, saacadaha: 9:00 - 16:00 (wakhtiga u dhexeeya waa qiyaas ahaan).**

- **Daryeelka caafimaadka ee Isbitaalku wuxuu u soconayaa sidii caadiga ahayd.**
- **Waxaa tababbarka loo abaabulayaa si uu saameynta ugu yar ee suurta galka ah ugu yeelanayo bukaannada iyo booqadayaasha.**
- **Dadka deggan iyo dadka meesha marayaba waxay arki doonaan ambalaasyo fara badan iyo gaadiid milleteri oo maalinta uu dhan marmaraya aagga ku hareereysan isbitaalka.**

### **Waa maxay sababta loo sameynayo tababbarka?**

Xarumaha caafimaadka ee NU waxay qeby ka yihiin gaashaandhigga guud ee Iswiidhan. Wuxuu isbitaalku u baahanyahay inuu diyaar u ahaado in xaalado adadag oo weyn iyo musiibooyin ay imaan karaan. Sida ugu fiican waa in la tababbarto, la tijaabiyo xuddudaha, waxna laga barto taas.

### **Ujeeddada laga leeyahay tababbarka**

Ujeeddada laga leeyahay Tababbarka NOLOL 2025 waa in la tijaabiyo awoodda isbitaalka, iyo in la xoojiyo u diyaarsanaanta bulshada ee xaaladaha adadag, ama dagaalka ay dhici karto inuu yimaado si:

- Kor loogu qaado awoodda wax ka qabashada iyo si habboon u daryeelidda qulqul bukaan oo fara badan oo u baahan qalliin la xiriira dhaawacyo mahadho reeba.
- Kor loogu qaado awoodda iyo aqoonta shaqaalaha ee ku aaddan shaqooyin aan kheyraad badan loo hayn oo u baahan hawl-karnimo iyo karti sare oo xagga kala soocidda iyo mudnaan siinta ah.
- Loo hormariyo qaababka wadashaqeynta iyo iskaashiga ee Gobalka Galbeedka Götaland (GGG) iyo Ciidamada qalabka sida/milleteriga gobalka Galbeedka oo wadajira.

### **Tababbar**

Tababbarku waa waxa loogu yeero metelaadda dhaawac fara badan oo ay dad badani dhaawacmeen (waa dad lagu sawiray dhaawacyo kala duwan oo wax metelaya ee maaha kuwo si dhab ah u dhaawacmay).

Cidda ay hor iyo horraan toos hawshu u saameyneyso waa goobaha shaqada iyo shaqaalaha xarumaha caafimaadka ee NU ee sida caadiga ah ka shaqeeya qeybaha kala duwan ee xaaladaha degdegga ah. Tusaale ahaan: hawlaha ambalaasta, qeybta xaaladaha degdegga, daryeelka degdegga ee dawooyinka, qeybaha degdegga ee qalliinka, raajiyaha, iyo suuxinta.

Urur gaar ah ayaa loo sameeyay Xarumaha caafimaadka ee NU iyo saaxiibbada ay wada shaqeeyaan. Kooxo badan ayaa ka shaqeeya qeybaha kala duduwan ee ka midka ah NOLOL 2025.

Tababbarro la mid ah ayaa horay looga fuliyay GGG oo kii ugu dambeeyay uu ka dhacay Isbitaalka Koonfurta Älvsborg ee Borås 2019, markaas ka horna Isbitaalka Jaamacadda ee Sahlgrenska ee Göteborg.

Haddii ay dhacdo weyni dhacdo isla maalinta la qabanayo tababbarka NOLOL 2025 waa la joojinayaa tababbarka.

Cusbooneysiinta boggaani waxay u dheceysaa si joogto ah.

### **Linkiyo xiriir la leh**

[Su'aalo iyo jawaabo ku saabsan NOLOL](#)

### **Filmaan**

[NOLOL 2025 – Lix bilood ayaa billaabidda ka dhimman](#) (waxaa la soo saaray Oktoobar 2024)

[Sidan ayuu tababbarka NOLOL u dhacayaa](#) (waxaa la soo saaray Diseembar 2024)

### **Su'aalo iyo xiriir**

E-mail: [nu.kommunikation@vgregion.se](mailto:nu.kommunikation@vgregion.se)